



## SHARCIYADA NIDAAMKA EE ESPOONKRUUNU (GURYAHA DABAQYADA AH)

Sababta sharciyadan loo sameeyey waa si dadka guryaha deggeni ay u helaan deggenaansho fiican iyo nabadgelyo. Qof waliba siduu u nool yahay waa inay ahaataa mid uu ku tixgelinayo dadka kale ee dhismaha deggen. Qofka guriga deggeni waa inuu sidoo kale xil iska saaraa, inay martidiisu dhowrto sharciyada.

### OGEYSIINTA GUURITAANKA (MUUTTOILMOITUS)

Sharciigu wuxuu dhigayaa, in qofku mar walba oo uu guryahan u soo guuro ama ka guuro ay waajib ku tahay inuu ogeysiyo xafiiska diiwaangelinta (maistraatti), Espoonkruunu waa inuu iyana soo ogeysiiyaa, si hawlaha maamulka gudaha iyo u adeegidda macaamiisha ee shirkaddu u suuroowdo.

### MEELAHA DADKA KA DHEXEYYA

Albaabada bannaanka ee meelaha dadka ka dhexeeyaa waa inay sakatuuro ku xirnaadaan saacadaha u dhexeeya 21.00-07.00, haddii albaabadaas la isticimaalana waa in la hubiyaa inay xirmeen. Meelaha dadka ka dhexeeya waa in si sanqar la'aan ah loo maraa, joogjoog macna daro ah iyo in sigaarna lagu cabbo lama ogola. Meelaha dadka ka dhexeeya iyo barxadda bannaankaba jidadkoodu waa inay nadiif ahaadaan, waana in aan waxba la dhigin. Xagga badbaadada dabka awgeed, alaabooyinka waxaa la dhigan karaa meelaaha loogu talagalay oo keliya. Tabeelayaasha (kilpien), xayaysiisyada, anteenoooyinka iwm. in guriga lagu rakibo waxaa la ogol yahay, haddii shirkadda ogolaansho laga haysto oo keliya.

### QOOLKA DHARKA LAGU DHAQDO

Qolka dharka lagu dhaqdo waxaa la isticimaali karaa saacadaha u dhexeeya 9-21 iyadoo la raacayo liiska ballansa-shada. Marka la isticimaalo ka dib, qolka dharka lagu dhaqdo waa inuu nadiif ahaadaa, waana in la hubiyaa in korontada la demiyey. Mishiinka dharka lama ogola in kadiifado lagu dhaqo. Dharku markay qallalaan, waa in si dhakhso ah looga gurtaa qolka dharka lagu qallajisto.

### QASHINKA

Qashinka guriga iyo qashimada kaleba waa in iyagoo xirxiran lagu ridaa haamaha qashinka, waa in la tixgeliyaa tilmaamaha lays faray ee ku saabsan kala soocidda qashinka. Qashinka kale ee aan ahayn qashinka guriga (sida qalabka guryaha) ee la tuurayo fogeeyntooda waxaa masuul ka ah qofka alaabta iska tuuraya. Qashinka dhibaataada leh sida dhalooyinka, beteriyaada, elektroniga iwm. waa in la geeyaa meelaha ay YTV ugu talagashay.

### MEELAHA BAABUURTA LA DHIGTO

Gaadiidka waxaa la dhigan karaa meelaha loogu talagalay ee loo calaameeyey oo keliya. Baabuurku inuu macna daro u istaarnaado lama ogola. Kharash baa ku waajibaya qofka baabuur tuuris ah ama qaybo baabuurka ka mid ah dhiga meelaha baabuurta loogu talagalay.

### GURYAHAH (HUONEISTOT)

Waa mabnuuc in loo noolaado hab dhaqan deriska dhibaato u keenaya. Saacadaha u dhexeeya 22-07 waa in derisku helaan habeen deggenaansho leh. Hawlaha ay shirkaddu ogolaatay iyo dayactirka keeni kara sanqar iyo dhawaaq dadku dhibsan karaan waa in hore loo soo ogeysiiyaa, waana in laysku dayaa in la sameeyo maalmaha shaqadu jirto inta ka horaysa saacaddu markay tahay 21. Guryaha waa in si fiican loo daryeelaa. Haddii cillad biyo soo daadanaya ama qulqulaya la arko iyo cilladaha lagu arko meelaha dadka ka dhexeeya waa in si degdeg ah loo ogeysiiyaa shirkadda daryeelka (huoltoliike). Godka musqulaha iyo meelaha kale ee boosoneerooyinka ah yaan lagu ridin qashin boosaneerada xiraya ama hallaynaya.

### BALAKOONADA

Balakoona waa mabnuuc in lagu garaaco katiifadaha iyo gogosha sariiraha. Waxaase lagu garaacan karaa meelaha loogu talagalay Isniin - Jimce saacadaha 8-20, Sabti 8-18, maalmaha feestooyinka iyo Axadaha waa mabnuuc. Dharka la xirto iyo maryaha galalka ah ee yar yar waa la ogol yahay in balakoona iyo meelaha loogu talagalayba lagu layriyo ama lagu qallajisto. Aad bay mabnuuc u tahay in balakoona wax lagu dubto (grillaaminen), sidoo kale lama ogola in balakoona shimbiro ama dabangaalle cunto lagu siiyo.

### XAYAWAANADA GURIGA LAGU HAYSTO

Guriga bannaankiisa xayawaanada guriga lagu haystaa waa inay xirnaadaa, mana aha inay dhibaateeyaan dadka kale ee dhismaha deggen. Xayawaanka guriga lagu haysto marka bannaanka la soo wareejinayo waa in aan la wareejinin barxadda dhismaha, meelaha carruurtu inay ku ciyaarto loogu talagalay iyo meelaha aad ugu dhodhow.

### JEBINTA XEERARKA

Jebinta sharciyada nidaamku waxay keeni kartaa, in qofka ay waajib ku noqoto inuu magdhow bixiyo, inay dhammaato xuquuqdiisa deggenaanshaha guriga ama heshiiskiisa ijaarka laga noqdo.